# Sharaxaada Qolonimada Qowmiyadda

Qaybta Waxbarashada Minnesota (MDE) waxay u baahan tahay dhammaan hay'adaha waxbarashada in ay ururiyaan oo ay soo sheegaan macluumaadkaan. Iyada oo la raacayo Sharciga Federaalka ee Macluumaadka Khaaska Ah ee 1974 iyo Sharciga Gobolka Minnesota ee Macluumaadka Khaaska Ah, looma baahna in aad bixiso macluumaadka ku saabsan qolonimada ama qowmiyada. Ma jiri doona wax xun oo ku saamaynaya adiga ama ardaygaaga haddii aad doorato in aadan bixin macluumaadkaas. Si kastaba ha ahaatee, iskaashigaaga inaad bixiso macluumaadka waxay hubinaysaa xaqiijinta sax ahaanteeda taasoo caawinaysa si loo fududeeyo fursadaha waxbarashda ee ardayda oo dhan u siman tahay. Ogow in aan u isticmaali doono macluumaadka hab ixtiraamaya khaasnimada ardaydeena iyo qoysaska.

## Qolonimada/Qowmiyadda Ardayga (Calaamee hal KALIYA [Foomka Diiwaangelinta])

[Kuwani waa noocyada dawladda MDE ay doonayso sharci ahaan]

| | |
|---|---|
| Calibeesteen | Dadka asalkooda yahay Qaarada Waqooyiga Ameerika isu aqoonsadana dhaqan ahaan qabiilada ama bulshad ahaan in ay ayaka ka mid yihiin. |
| Eeshiyaan ama Jasiiradaha Basifika | Dadka asalkooda yahay dadka Bariga Shishe, BarigaKoofurta Eeshiya, Jasiiradaha Basifika ama Hindida Qaarada Eesha hoosteed. Halkaasi waxaa ka mid ah Jayna, Indiya, Jabaan, Kuuriya, Jasiiradaha filibiinka iyo kuwa Samoa. |
| Isbaanish | Dadka ka yimid Meksiko, Puerto Rican, Kuuba, Bartmada ama Koofurta Qaarada Ameerika, ama dhaqan kale ama asal kale oo Isbaanish ah - taasoo aysan ku xirnayn qolonimada. |
| Madow, aanan ahayn asalkiis Isbaanish | Dadka asalkooda yahay Madowga Qaarada Afrika. |
| Cadaan, aanan ahayn asalkiis Isbaanish | Dadka asalkooda yahay dadka Yurub, Waqooyiga Afrika, ama Bariga Dhexe. |

## Noocyada Qolonimada Federaalka/ Qawmiyadda oo u baahan yahay barnaamijka In Cunug Gadaal Looga Tagin.
## Buuxi Qaybaha A iyo B [Foomka Diiwaangelinta]

### Qaybta A – Calaamee hal KALIYA [Foomka Diiwaangelinta]

| | |
|---|---|
| Qowmiyadaada ma Isbaanishabaa ama Laatiin? | Kuuba, Meksiko, Puerto Rican, Bartmada ama Koofurta Qaarada Ameerika, ama dhaqan kale ama asal kale oo Isbaanish ah - taasoo aysan ku xirnayn qolonimada. “Asal Isbaanish ah” waxaa loo isticmaali karaa “Isbaanisha ama Laatiin”. |

### Qaybta B – Calaamee DHAMAAN kuwa anfaca [Foomka Diiwaangelinta]

| | |
|---|---|
| Calibeesteen / Qof u Dhashay Alaska | Dadka asalkooda yahay Qaarada Waqooyiga iyo Koofurta Ameerika, oo ku jiraan Bartamada Qaarada Ameerika, iyo xiriirna la leh qabiilka ama bulshada. |
| Eeshiyaan | Dadka asalkooda yahay dadka Bariga Shishe, BarigaKoofurta Eeshiya, ama Hindida Qaarada Eesha hoosteed, oo ka mid tusaale ahaan Kamboodiya, Jayna, Indiya, Jabaan, Kuuriya, Maleeshiya, Bakistaan, Jasiiradaha filibiinka, Taylaand iyo Fiyetnaam. |
| Madow / Madowga Maraykanka | Dadka asalkooda yahay Madowga Qaarada Afrika. |
| Qof u Dhashay Jasiiradda Hawaay / Jasiiradaha BasifikaNative | Dadka asalkooda yahay dadka ka yimid Jasiiradda Hawaay, Guwaam, Samoa, iyo Jasiiradaha Basifika oo kale. |
| Cadaan | Dadka asalkooda yahay dadka Yurub, Bariga Dhexe ama Waqooyiga Afrika.<br>A person having origins in any of the original peoples of Europe, the Middle East or North Africa. |